40. Waxaannu idiinka digaynaa Cad-
dibaad dhaw Maalinta uu arki Ruux
walba waxay Gacmihiisu hor mar-
sadeen, Gaalkuna uu dhihi Shallay-
tadaydee maan Carro noqdo.

إِنَّآ أَنذَرۡنَٰكُمۡ عَذَابٗا قَرِيبٗا يَوۡمَ يَنظُرُ ٱلۡمَرۡءُ
مَا قَدَّمَتۡ يَدَاهُ وَيَقُولُ ٱلۡكَافِرُ يَٰلَيۡتَنِي كُنتُ تُرَٰبَۢا ﴿٤٠﴾

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu tahay wax sugan ruuxii rumeeyana ee xaqa raaca uu ugu abaal-mariyo Janno iyo wanaag.
Maalinta Qiyaame iyo dhibaatadeedana waa in Ruuxii Caqli leh u darbadaa, illeen waa Maalin xaq ah, ruux walbana wuu arki wuxuu hor marsaday, calaacalna uusan wax taraynin ee camal wax taro. An-Naba' (28-40).

# Suurat An-Naazicaat سُورَةُ النَّازِعَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariis-ta.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Malaa'igta Nafta si daran uga siibta (gaalada).

وَٱلنَّٰزِعَٰتِ غَرۡقٗا ﴿١﴾

2. Iyo tan si fudud uga qaadda (mu‘miniinta).

وَٱلنَّٰشِطَٰتِ نَشۡطٗا ﴿٢﴾

3. Iyo Malaa'igta Hawada Dab-baalata (si amar fulin).

وَٱلسَّٰبِحَٰتِ سَبۡحٗا ﴿٣﴾

4. Iyo tan u orotanta wanaagga.

فَٱلسَّٰبِقَٰتِ سَبۡقٗا ﴿٤﴾

5. Iyo kuwa Maamula amarka (Eebe).

فَٱلۡمُدَبِّرَٰتِ أَمۡرٗا ﴿٥﴾

6. Maalinta ay gilgilan afuufka (hore).

يَوۡمَ تَرۡجُفُ ٱلرَّاجِفَةُ ﴿٦﴾

7. Oyna raaci tii dambe (waa su-gantahay).

تَتۡبَعُهَا ٱلرَّادِفَةُ ﴿٧﴾

8. Qalbiyaduna Maalintaa way cab-san.

قُلُوبٞ يَوۡمَئِذٖ وَاجِفَةٌ ﴿٨﴾

9. Araggeeduna wuu dullaysnaan.

أَبۡصَٰرُهَا خَٰشِعَةٞ ﴿٩﴾

10. Waxayna dhihi (Gaaladu) Ma raadkiibaa naloo celin (Adduunkii).

يَقُولُونَ أَءِنَّا لَمَرۡدُودُونَ فِي ٱلۡحَافِرَةِ ﴿١٠﴾

11. Markaan noqonno Lafo duu-goobay.

أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمٗا نَّخِرَةٗ ﴿١١﴾

12. Waxay dheheen taasi waa no-qosho khasaara ah.

قَالُواْ تِلۡكَ إِذٗا كَرَّةٌ خَاسِرَةٞ ﴿١٢﴾

13. Waa uun Hal Qaylo kaliya. فَإِنَّمَا هِيَ زَجۡرَةٞ وَٰحِدَةٞ ١٣

14. Dadkuna markaas ay Dhulka kor iman. فَإِذَا هُم بِٱلسَّاهِرَةِ ١٤

Eebe wuxuu ku dhaartay Malaaigta siduu wax badan khalqigiisa ugu dhaartay in Qiyaamadu wax sugan tahay dhibaatana leedahay Eebe Cid uu ka koriyo mooyee, Dadkana waa la soo kulmin si loo abaalmariyo, Eebaha abuuriddoodii karayna kama daalo inuu soo bixiyo wayna u fududdahay.
Tirmidi wuxuu wariyay: in Rasuulkii Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee markuu tago Habeenka Daloolkiis wuu istaagi jiray, wuxuuna dhihi jiray: «Dadoow xusa Eebe Afuufiddii hore timid tii dambena way raaci, Geerina timid iyo wixii ku dhex sugan». An-Naazicaat (1-14).

---

15. Ma ku soo gaadhay warkii (Nabi) Muuse. هَلۡ أَتَىٰكَ حَدِيثُ مُوسَىٰٓ ١٥

16. Markii Eebe uga yeedhay Toggii barakaysnaa ee Dhuwa. إِذۡ نَادَىٰهُ رَبُّهُۥ بِٱلۡوَادِ ٱلۡمُقَدَّسِ طُوًى ١٦

17. Kuna yidhi u tag Fircoon wuu xadgudbaye. ٱذۡهَبۡ إِلَىٰ فِرۡعَوۡنَ إِنَّهُۥ طَغَىٰ ١٧

18. Oo ku dheh ma rabtaa inaad daahir noqotid. فَقُلۡ هَل لَّكَ إِلَىٰٓ أَن تَزَكَّىٰ ١٨

19. Oon Eebe Jidkiisa kugu hanuuniyo kana yaabtid. وَأَهۡدِيَكَ إِلَىٰ رَبِّكَ فَتَخۡشَىٰ ١٩

20. Wuxuuna tusiyay (Nabi-Muuse) Aayad wayn. فَأَرَىٰهُ ٱلۡأٓيَةَ ٱلۡكُبۡرَىٰ ٢٠

21. Wuuse beeniyay oo caasiyay (Fircoon). فَكَذَّبَ وَعَصَىٰ ٢١

22. Wuuna jeedsaday isagoo xumaan la socda. ثُمَّ أَدۡبَرَ يَسۡعَىٰ ٢٢

23. Wuxuuna kulmiyay (Askartii) una Qaylyay. فَحَشَرَ فَنَادَىٰ ٢٣

24. Isagoo dhihi waxaan ahay Eebihiinna sare. فَقَالَ أَنَا۠ رَبُّكُمُ ٱلۡأَعۡلَىٰ ٢٤

25. Markaasaa Eebe Ciqaabay Aakhiro iyo Adduunba. فَأَخَذَهُ ٱللَّهُ نَكَالَ ٱلۡأٓخِرَةِ وَٱلۡأُولَىٰٓ ٢٥

26. Arrintaasna waano yaa ugu sugan Ruuxii Eebe ka yaabi. إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبۡرَةٗ لِّمَن يَخۡشَىٰٓ ٢٦

Nabi Muuse wuxuu Eebe faray inuu Dadkii Masar dagganaa Xaqa ugu yeedho hase yeeshee Fircoon oo xukunka haystay yaa ka hor joogsaday, uguna yeedhay inay isaga addeecaan, mar hadduu awoodda sare isagu leeyahay, ugu dambayntiise Fircoon iyo colkiisiiba waa la halaagay waxaana dhulkii u hadhay Nabi-Muuse iyo intii la jirtay ee xaqa rumaysay, taasina waxay ku tusin in xumaantu tagi xaquna hadhi. An-Naazicaat (15-26).

27. Ma idinkaa daran abuuridda mase Samada Eebaa dhisay.

ءَأَنتُمْ أَشَدُّ خَلْقًا أَمِ ٱلسَّمَآءُ ۚ بَنَىٰهَا ﴿٢٧﴾

28. Korna yeelay jurmigeeda ekee-yayna.

رَفَعَ سَمْكَهَا فَسَوَّىٰهَا ﴿٢٨﴾

29. Habeenkeedana madoobeeyay Maalinteedana soo bixiyay (Ifiyay).

وَأَغْطَشَ لَيْلَهَا وَأَخْرَجَ ضُحَىٰهَا ﴿٢٩﴾

30. Dhulkana markaas ka dib fidiyay.

وَٱلْأَرْضَ بَعْدَ ذَٰلِكَ دَحَىٰهَآ ﴿٣٠﴾

31. Biyahiisa iyo Daaqiisana soo bi-xiyay.

أَخْرَجَ مِنْهَا مَآءَهَا وَمَرْعَىٰهَا ﴿٣١﴾

32. Buurahana sugay.

وَٱلْجِبَالَ أَرْسَىٰهَا ﴿٣٢﴾

33. Si aad idinka iyo Xoolihiinnu ugu nacfidaan.

مَتَٰعًا لَّكُمْ وَلِأَنْعَٰمِكُمْ ﴿٣٣﴾

34. Markay timaaddo Musiibadii waynayd (qiyaamadu).

فَإِذَا جَآءَتِ ٱلطَّآمَّةُ ٱلْكُبْرَىٰ ﴿٣٤﴾

35. Maalintaas Dadku way xusuusan waxay faleen.

يَوْمَ يَتَذَكَّرُ ٱلْإِنسَٰنُ مَا سَعَىٰ ﴿٣٥﴾

36. Naarta Jaxiimana waxaa loo muu-jin Ruuxii Arki.

وَبُرِّزَتِ ٱلْجَحِيمُ لِمَن يَرَىٰ ﴿٣٦﴾

37. Ruuxiise xadgudba.

فَأَمَّا مَن طَغَىٰ ﴿٣٧﴾

38. Nolosha Adduunyana doorta.

وَءَاثَرَ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا ﴿٣٨﴾

39. Wuxuu ku dheelman Naarta Ja-xiimo.

فَإِنَّ ٱلْجَحِيمَ هِىَ ٱلْمَأْوَىٰ ﴿٣٩﴾

40. Ruuxiise ka yaaba la kulanka Ee-be Naftana ka reeba Hawada (xun).

وَأَمَّا مَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِۦ وَنَهَى ٱلنَّفْسَ عَنِ ٱلْهَوَىٰ ﴿٤٠﴾

41. Wuxuu u dheelman Janno.

فَإِنَّ ٱلْجَنَّةَ هِىَ ٱلْمَأْوَىٰ ﴿٤١﴾

42. Waxay ku waydiin Saacadda (Qiyaamaha) markay sugnaan.

يَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلسَّاعَةِ أَيَّانَ مُرْسَىٰهَا ﴿٤٢﴾

43. Maxaa ku ogaysiiyay waqtigeeda.

فِيمَ أَنتَ مِن ذِكْرَىٰهَآ ﴿٤٣﴾

44. Eebe umbuu ku dhammaan o-gaansheheedu.

إِلَىٰ رَبِّكَ مُنتَهَىٰهَآ ﴿٤٤﴾

45. Adugu waxaad tahay uun u di-gaha Ruuxii ka yaabi.

إِنَّمَآ أَنتَ مُنذِرُ مَن يَخْشَىٰهَا ﴿٤٥﴾

46. Waxay la mid noqon Malintay arkaan (Qiyaamada) iyagon nagaanin Galab iyo Barqin mooyeen (Adduunka).

كَأَنَّهُمْ يَوْمَ يَرَوْنَهَا لَمْ يَلْبَثُوٓا۟ إِلَّا عَشِيَّةً أَوْ ضُحَىٰهَا ﴿٤٦﴾

Isagoo Eebe u nicmeeyay yaa haddana Dadku xaqa beenin iyo Qiyaamadaba, markase dhabtu timaaddo Eebana la hor yimaaddo waxaa la kala aadi Laba Waddo, Jaxiima iyo Janno, Qiyaamadu markay dhicina Eebaa ku cilmi leh. mase aha wax la dadajisto, waxaase wax tari in wanaag la hormarsado, raaxa Adduun iyo ku raagiddiisuba waa wax yar. Qataada wuxuu yidhi: Addunyadu way la yaraan Dadka markay Aakharo arkaan. An-Naazicaat (27-46).

# Suurat Cabasa

# سُورَةُ عَبَسَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wajiguu u uruuriyay oo jeedsaday (Nabigu).

عَبَسَ وَتَوَلَّىٰٓ ﴿١﴾

2. Inuu u yimid kii Indhaha la‘aa.

أَن جَآءَهُ ٱلْأَعْمَىٰ ﴿٢﴾

3. Miyaad ogtahay inay u dhawdahay inuu hanuuno oo Daahir noqdo.

وَمَا يُدْرِيكَ لَعَلَّهُۥ يَزَّكَّىٰٓ ﴿٣﴾

4. Ama uu xusuusto oy xusuustu anfacdo.

أَوْ يَذَّكَّرُ فَتَنفَعَهُ ٱلذِّكْرَىٰٓ ﴿٤﴾

5. Ruuxiise is deeqtoonaysiiya (islana waynaada).

أَمَّا مَنِ ٱسْتَغْنَىٰ ﴿٥﴾

6. Ma; Adaa u bambixi.

فَأَنتَ لَهُۥ تَصَدَّىٰ ﴿٦﴾

7. Maxaa kaa saaran hadduusan hanuunin.

وَمَا عَلَيْكَ أَلَّا يَزَّكَّىٰ ﴿٧﴾

8. Ruuxiise kuu yimaadda isagoo dagdagi.

وَأَمَّا مَن جَآءَكَ يَسْعَىٰ ﴿٨﴾

9. Oo Eeba ka yaabi.

وَهُوَ يَخْشَىٰ ﴿٩﴾

10. Miyaad ka shuqloomi.

فَأَنتَ عَنْهُ تَلَهَّىٰ ﴿١٠﴾

11. Saas ma; aha ee Aayadahani waa waano.

كَلَّآ إِنَّهَا تَذْكِرَةٌ ﴿١١﴾